W

# MASHRUUCA HORUMARINTA DAAQA

# EE GOBOLLADA DHEXE

## QAYBTA WAXBARASHADA DADBAN

## BUUG YARAHA II AAD



# ILAALINTA

Protecting Watershed

# GOOBAHA BIYAHA


W-1

## ILAALAATA GOOBAHA BIYAHA .

1. Maqaalkan soo socda waxaa laga soo qaatay buugyaraha tababarka, waxayna ku salaysan tahay waayo-aragnimo laga dhaxlay dalka Kiinya oo goobaha biyaha ee daaqsinta xoolaha ku yaal loo daryeelay siyaabaha hoos ku qoran. Natiijooyinkii ka soo baxay aad bay u wanaagsanaayeen. Waxaa kaloo uu qoraalku ku habaysan yahay indha-indhayn guud oo lagu sameeyey goobaha biyaha ee hadda ku yaal gobollada iyo degmooyinka hoos yimaada Mashruuca Daaqa Gobollada Dhexe ee Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, kuwaasoo si ba'an ugu baahan wax ka qabasho iyo dib u habayn xagga maamulka iyo qodaalkoodaba.

## MAQAALKII .

2. Qofkasta wuu la socdaa in marka xooluhu ay ka cabbayaan ceelasha (goobaha biyaha aysa qoraalkan loo isticmaalay), ay dhirtu si ba'an ugu idlaato soonayaasha agagaarka ceelasha ku dhow dhow. Waxay dhir la'aantani keentaa xaa xaalufid ku habsata geyigaas, dhul aad u ballaaran ayaana gabaahirig isugu soo baxa. Sababta ugu weyn ee masiibadan dhalisaa waxay ka imaanaysaa afka iyo qoobka kumaankunka xoolaha ah ee ceelasha imaanaya, dabadeedna la horayo inta ay sugayaan miilahooda waraabka inta aanay soo gaarin darkii biyaha. Arrintaani waxay waxyeello weyn u geysataa degaanka ceelasha iyo xoolaha naf ahaantoodaba.



HORNAANSHAHA AY XOOLUHU MUDDO DHEER SUGAYAAN DARKA CEELKA WAXAY XOOLAHU U GEYSATAA DHIBAATO.

W-2



3. Si looga hortago dhibaatada iyo dhaawac ay geysanayso arrintani, waxaa lagama maarmaan ah in qodobbada soo socda la dhaqan geliyo, kuwaasoo meelihii lagaga dhaqmay guulo dhaxalgal ah laga soo hooyey :-

b. Meelaha looga baahan yahay ayaa waxaa la dhisaa haamo biyo dheeraad ah lagu kaydiyo si xaddi biyo badan loo helo. Waxaa la buuxin karaa haamaha waqtiyada ku habboon, taas waxaan uga jeednaa waqtiyada deggan ee xooluhu maqan yihiin, sida habeynka oo kale.

t. Haamaha ayaa lagu rakibaa dhuumo waaweyn oo biyaha qaada oo gaarsiiya waaskooyin badan. Waaskooyinku waxay leeyihiin ballacyo iyo joogag kala duwan si noocyada xoolaha ay ugu kala habboonaadaan. Waaskooyinkaan faraha badan iyo dhuumaha biyaha qaadayaa waxay yaraynayaan, waxna ka qabanayaan dhibaatadii ballaarayd ee xoolaha ka soo gaari lahayd hornaanshaha waqtiga dheer qaadan lahaa inta ay darka ceelka iyo meelahooda sugayaan. Haddii soo saaridda biyaha ee dhuumaha, mugga biyaha lagu kaydinayo haamaha iyo habka waraabka degaanka la gaarsiiyo heerka ugu sarreeyo waxaa hubaal ah inuu yaraanayo waqtiga ay xooluhu biyaha u hornaanayaan. Arrintani waxay leedahay labo faa'iido oo kal ah :- Ugu horrayn, waxaa yaraanaya nabaadguurkii, marka kale, xoolihii waxay fursad wanaagsan u helayaan waraabkii iyagoo aan cidina ku kaalin riixin. Qofkast oo daawada xoolaha ka cabbaya ceelasha ee arka sida ay isugu badan yihiin iyo muddada dheer oo ay kaalinka sugayaan wuxuu u garaabi doonaa qiimaha iyo kaalinta uu ku fadhiyo habkani marka laga eego daryeelka iyo taranka xoolaha.


j. Waaskooyinka biyaha waxaa loo nadiifiyaa si joogto ah. Xooluhu ma jecla biyaha wasakhda leh haddii ay helayaan kuwo nadiif ah, tanina waxay lagama maarmaan ka dhigaysaa in maadaama ay xooluhu jecel yihiin, kana cabbayaan waaskooyinka nadiifsan, aad loo daryeelo nadaafadda waaskooyinka, dhuumaha biyaha qaada iyo haamaha dirkaba.

x. Agagaarka waaskooyinka biyaha iyana waa in la shamiinteeyo, loona nadiifiyaa si joogto ah, si ay meeshoo dhani ugu soo baxda bilicsanaan, una hesho daryeel caafimaad. Wasakhda, dhooqada, iwm. ee ku urura agagaarka waaskooyinka biyaha ee dadka iyo xooluhuba ku tumanayaan durba waa qurmaan, waxayna yeeshaan ur aad u xun. Meelaha ay ceelasha xooluhu ka cabbaan ka dhex-qodan yihiin magaalooyinka, waxaa waajib ah in laga sameeyo ceelasha magaalada dibeddeeda, laguna xiro dhuumo iyadoo la adeegsanayo hab cusub oo biyo-gelin ah si xooluhu iyo waaskooyinka ay ka cabbayaanba uga baxsanaadaan magaalada.

Kh. Agagaarka waaskooyinka biyaha waxaa iyana lagama maarmaan ah in la kala oodo si noocyada xoolaha kala duwan loogu kala duwo waaskooyinka loo kala sameeyey ee kala duwan. Geelu wuxuu leeyahay waaskooyin gaar ah oo isaga loogu talagalay, lo'da waxay ka cabbaysaa kuwo kale ee ku habboon, ariguna wuxuu leeyahay waaskooyin nooc kale ah oo lagu habeeyey qaab dhismeedkiisa.

## DHABAYAASHA XOOLAHA.

4. b. Dhabbayaasha ay xooluhu marayaan waa laga oodaa dhan walba iyadoo la adeegsanayo geedo ama silig looga xayndaabayo xoolaha inaysan marin dhabba kale. Dhabbayaasha xooluhu ay ka soo qaadayaan duurka waxaa lagu soo ridaa dhulka oodan ee agagaarka waaskooyinka biyaha ku yaal iyagoo dhabbayaasha looga soo ridayo meelo ka baxsan agagaarka ceelka ee nabaad-guursan. Dhabbe kaa la mid ayaa xoolaha wabaxa ah dib loogu fushaa. Meesha ay xooluhu kaga soo dhacaan dhabbada markay aroorka yihiin iyo halka ay kaga dhacaan markay fulliinka yihiin waxay loo sameeyey inay xooluhu ka soo galaan, kana baxaan dhul aan nabaad-guuri karin ilaa intii suurtagal ah.




SHAXANKU WUXUU MUUJINAYAA CEEL DHULKA AGAGAARKIISA AHI LA XIRAY OO XOOLAHA LOO BANNEEYEY DHABBAYAAL AY KA SOO GALAAN MARKA AY OOMAN YIHIIN IYO KUWO AY KA BAXAAN MARKA AY WABAXA YIHIIN.

w-4



t. Dhammaan dhulka nabaad-guuray ee agagaarka ceelka waa la oodaa iyadoo xoolaha loo bannaynayo labo dhabbe oo midna ay ceelka ugu soo arooraan, midna ay ku fulaan oo keliya.

j. Waxaa dhabbada ay xooluhu ku soo aroorayaan lagu teedshaa xeryo xoolaha lagu horo, haddana mid laga kexeeyo oo lagu xereeyo midda ka xigta xagga waaskada marka xoolihii ka horreeyey ay iyana kacaan iyo si ay xoolaha kuwo fulliinka iyo kuwa oomaniba ay u kala helaan meelo ay kala maraan. Xeryahan kala horidda xoolaha waxaa lagu teedshaa dhinacyada dhabbayaasha xoolaha.

x. Digada fara badan ee xoolaha ee ku daadanaysa dhabbayaasha xoolaha awgeed, waxaa dhinacyada oodaha ama siligga ku xayndaaban hareeraheeda ka baxaya caws iyo geedo kale oo haraya kara xayndaabta waqtiyada roobabku da'aan.

kh. Dhir iyo geedo ayaa lagu beeraa xayndaabyada waaweyn dhexdooda iyo dhabbayaasha xoolaha hareerahooda. Hilaanka digada iyo biyo ayaa aad u sahlaya koritaanka dhirta. Tallaabooyin kale oo dhulka lagu samatabixinayo ayaa la qaadaa. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid ah iyadoo abuur lagu simo dhulkii laga ooday ee agagaarka ceelka ahaa. Dhulkii ay dabayluhu waxyeeleeyeen oo horay u nabaadguuray waxaa dib ugu soo noqonaya bilicdii iyo dhirtii ka baaba'day. Tanina waxay guulo dhaxalgala u leedahay dhulka iyo inta uu daaqa xooluhu khuseeyo.

d. Waxaa dabadeed taas lagu xihin karaan dhir beerid looga gaashaanto dabaysha, laga harsado milicda iyo kuwo loo adeegsado in laga helo qoryo la shito, waxaana dhirtaan lagu beeri karaa meelo ku habboon.

## SHAQAALE.

5. Shaqaalaha mashruuca barnaamijka cuntada adduunka ayaa la heli karaa, waxayna gacan ka geysan karaan ilaalinta goobaha biyaha waxaa kaloo loo baahan yahay koox farsamoyaqaanno horumarinta biyaha oo qabta hawlaha farsamada biyaha.